FI-Alert

FI-Alert
Waxaa uu digniinaha ku saabsan arrimaha khatarta ah, si toos ah kuugu soo gudbinayaa telefoonkaaga gacanta.



Ogeysiis ka soo baxay wasaaradda arrimaha gudaha
9.11.2026

FI-Alert waxaa uu hay'adaha dowladda ka caawiyaa in ay dadka si degdeg ah uga digaan arrimaha ku saabsan khataraha. Haddii ay agagaarkaaga ka dhacdo arrin khatar ah, waxaad digniin ku saabsan arrintaas si toos ah uga heli doontaa telefoonkaaga gacanta. Markaad hesho digniin ku saabsan xaalad khatar ah, si deggan u akhri, raac oo u hoggaansan hagista ama tilmaanbixinta ku qoran.

Digniintu waxay ka soo muuqan kartaa telefoonkaaga, waxaadna maqli doontaa dhawaaq, xitaa haddii codka telefoonkaagu uu xiran yahay ama aamusnaanta uu joogo. Digniinta waxaa sidoo kale la socon kara dhawaaq gaar ah iyo gariir, si aad u dareento farriinta soo dhacday.

Digniinta ku saabsan xaaladda khatarta waxaa la soo diri karaa, tusaale ahaan, marka ay dhacaan shil, khatar deegaanka la xiriirta ama khatar kale. Mararka qaarkood, marka ay jirto xaalad khatar ah, waxaa muhiim noqon karta in aad gudaha dhismaha ku sugnaato, ka fogaato deegaan gaar ah ama aad raacdo tilmaanbixinta ama hagista kale ee hay'adaha dowladda. Taasi waa sababta dadka looga digo khataraha.

FI-Alert waxaa uu ku shaqaynayaa telefoonnada isticmaala shabakadaha 4G iyo 5G ee ku xiran shabakadda telefoonnada gacanta. Hay'adaha dowladda waxay digniinta si toos ah ugu diri karaan taleefannada ku sugan aagga ay khatartu ka jirto.

Digniintu waxay si toos ah ugu soo dhacaysaa telefoonkaaga. Uma baahnid in aad soo degsato barnaamij gaar ah ama aad isdiiwaangeliso. Sidoo kale nidaamkan ma uruurinaayo xogta dadka isticmaala.

Nidaamka digniinaha khatarta ee FI-Alert waxaa laga tijaabin doonaa Finland oo dhan Talaado, 24.11.2026, saacadda 12:00 duhurnimo.
Si aad u hesho digniinta, waa in telefoonkaaga aad cusboonaysiisaa (päivittää) bisha Nofembar gudaheeda.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan nidaamka digniinaha khatarta ee FI-Alert:
FI-Alert – Digniinaha khatarta | Adeegga Badbaadada Finland

Mahadsanid,
Wasaaradda Arrimaha Gudaha

Ministry of the Interior
Finland